

Caanaha hooyada: Nafaqada Lagu Darayo (Adigoo isticmaalaya NeoSure® ama Enfacare® formula)

Maxaan ugu baahnahay in aan nafaqo ku daro caanaha hooyada?

Qaar ka mid ah ilmaha dhasha sidkooda ka hor waa in la siiyo nafaqo ah cayilin si ay u "gaaraan" culeys iyo dherer fiican marka guriga la geynayo. NeoSure® ama Enfacare® ah budada formula ayaa loogu dari karaa caanaha si nuunnaha loogu kordhiyo nafaqada cayilka.

Sidee baan u sii nafaqeyn karaa caanaha hooyada?

1. Gacmaha si fiican ugu dhaqo saabuun iyo biyo. Dhaq dusha sare ee qasacadda caanaha formula ka hor inta aadan furin si aad uga ilaaliso in jeermisku u gudbo masaasadda. Isticmaal weel iyo masaasad nadiif ah.
2. Caanaha hooyada waxaa ugu fiican in wax lagu qaso marka ay yihiin heerkulka guriga ama ay yara kulul yihiin. Budada cayilka laguma qasi karo marka ay caanaha hooyadu qabow yihiin.
3. Jaantus ka eego bogga 2aad. Adigoo isticmaalaya koob leh lambarrada cabbirka, oo ku shubo inta aad rabto oo ah caanaha hooyada. Meel siman dhigo koobka wax lagu cabbiro, oo adigoo gaarsiinaya indhaha iska hubso heerka caanaha.
4. Isticmaal malqacad ah nooca cabbirka ama caagga budada qasacadda si aad u cabbirato formula budo ah. Gaarsii heer sax ah, ha kala badin, cabbirka.
5. Budada ku darso caanaha hooyada. Isku qas ilaa aad ka weydo burtuqyo.

Muddo intee le'eg ayaan haysanayaa nafaqada iyo caanaha hooyada?

Dabool oo qabojiyaha gasho caanaha hooyada ee aad ku qastay nafaqada. Iska tuur caanaha hooyada ee nafaqaysan ee aadan isticmaalin 24 saac.

Iska tuur qasacadda ah formula furan marka aadan la isticmaalin hal bil.

Sida aad isugu diyaarineyso quudinta nuunnaha

1. Si tartiib ah isugu qas caanaha hooyada iyo budada nafaqada ah.
2. Xoogaa kululeyso caanaha hooyada adigoo dhex gashanaya biyo diirran.

Marna ha gelin kululeeyaha cuntada sababtoo ah uma kululeeyo si isku mid ah, ee qeyb "ayaa kululaata" oo afka nuunnaha ayaa ku guban kara.

3. Markaad caanaha biyo ku kululeysato, si tartiib ah u rux dhalada. **Mar kasta** iska hubso kuleylka caanaha ka hor intaadan siin ilmaha.
4. Iska tuur wixii ah caano qasan oo ku hara dhalada ka dib markaad ilmaha siiso caanaha.

Jaantuska Caanaha hooyada + NeoSure® ama Enfacare®

Buddada halkii oonsi	Caanaha hooyada	Budada formula (heer, aan aad u buuxin)
<input type="checkbox"/> 22	1 ½ oonsi (45 ml)	¼ qaaddo-shaah
	3 oonsi	½ qaaddo-shaah
	8 oonsi (1 koob)	1 qaaddo-shaah + ½ qaaddo-shaah
	10 oonsi (1¼ koob)	2 qaaddo-shaah
	16 oonsi (2 koob)	1 qaaddo
	20 oonsi (2 ½ koob)	1 qaaddo-budo
<input type="checkbox"/> 24	1 ½ oonsi (45 ml)	½ qaaddo-shaah + 1/8 qaaddo-shaah
	3 oonsi	1 qaaddo-shaah + 1/4 qaaddo-shaah
	8 oonsi (1 koob)	1 Qaaddo
	10 oonsi (1¼ koob)	1 qaaddo-budo
	12 oonsi (1½ koob)	1 Qaaddo + 2 qaaddo-shaah
	16 oonsi	2 qaaddo
<input type="checkbox"/> 26	50 ml	1 qaaddo-shaah
	2 oonsi (1/4 koob)	1 qaaddo-shaah + 1/4 qaaddo-shaah
	5 oonsi	1 Qaaddo
	7 oonsi	1 qaaddo-budo
	15 oonsi	3 Qaaddo
<input type="checkbox"/> 27	3 oonsi	2 qaaddo-shaah + 1/4 qaaddo-shaah
	4 oonsi (1/2 koob)	1 Qaaddo
	6 oonsi (3/4 koob)	1 qaaddo-budo
	8 oonsi (2 koob)	2 Qaaddo
	21 oonsi	1/3 koob
<input type="checkbox"/> _____		

1 Qaaddo = 3 qaaddo-shaah

Su'aalo?

Haddii aad na weydiineyso wax su'aalo ah, la soo xiriir qeybta adeegyada nafaqada ee isbitaalka saacadaha maalintii.

Children's Minnesota isbitaalka Minneapolis

612-813-6865 ama 612-813-6960 (NICU)

Children's Minnesota Isbitaalka St. Paul

651-220-5678